Länsförsäkringar Göteborg och Bohuslän

Wargelin caymis

Caymiska shilalka

Magaalada Göteborg

Magaalada Göteborg waxay gashay heshiis caymiska shilalka ah ee ardayda, carruurta, dhalinyarada iyo kooxaha kale ee kamidka ah qaybaha waxqabadyada ee magaalada.

Lambar caymis: 2083121 • Waqtiga caymiska 2022-07-01–2023-06-30

Cidda caymisku khuseeyo	Waqtiga caymisku shaqaynaayo
Carruurta da'doodu u dhaxayso 0-17 jir - Carruurta ka diiwaan gashan magaalada Göteborg. Carruurta ka timid degmooyinka kale kana tirsan waxqabadyada degmada,waxqabadyada gaarka ah iyo iskuulada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee magaalada Göteborg. Carruurta magangelyo doonka-iyo kuwa kaligood yimid sidoo kale caruurta la qariyay iyo kuwa aqoonsi la'aanta ah ee magaalada Göteborg. - Qaxootiga ka yimid wadanka Yukrayn ee da'doodu u dhaxayso 0-18 jir. -	**Waqti buuxa**
Ardayda dugsiga sare laga bilaabo 18 jir - Ardayda dugsiga sare ee dhigta iskuulada degmada,kuwa gaarka loo leeyahay-ama dugsiyada sare ee ardayda baahida gaarka ah qabo ee magaalada Göteborg oo ay ku jiraan ardayda ka timid degmooyinka kale - Ardayda dugsiyada sare ee ka yimid magaalada Göteborg kana dhigta iskuulada dugsiga sare iyo kuwa iskuulada dugsiga sare ee ardayda baahiga gaarka ah qabo degmo kale	**Waqti buuxa**
Kuwa kale ee caymiska ku jira - Ka qaybgalayaasha waxbarashada dadka waa wayn ee degmada iyo waxbarashada gaarka ah ee dadka waawayn ee ka tirsan maamulka waxbarashada. Ka qaybgalayaasha fuliya tijaabooyinka iyo shaqooyinka ka tirsan quusitaanka iyo sidoo kale tababarada ku salaysan goobaha shaqada, tijaabooyinka shaqo iyo shaqo mashruuceedyada - Hoggaamiye kamid ah waxqabadyada degmada ee aan qaybta ka ahayn caymiska dhaawaca shaqada	**Waqtiga waxqabadka shaqada**

Qeexitaano

Waqti buuxa
Saacad walba

Iskuulka-/waqtiga waxqabadka
Caymisku wuxuu shaqeeyaa inta lagu jiro wakhtiga qofka caymiska kujiro ka qaybqaadanayo hawlaha ay degmada ka qabato ee dugsiyada, xanaanada carruurta ama wax u dhigma iyo tagista iyo ka imaanshaba. Caymisku waxa kale oo uu khuseeyaa hawlaha kale ee uu qabanqaabiyo dugsigu/hawlaha uu ogolaado maamulaha dugsiga ama wax u dhigma, sida safarada dugsiga iyo shaqoyinka tababarada shaqo ee ardayda ee loo yaqaan PRAO



Länsförsäkringar Göteborg och Bohuslän

Qaybaha caymiska	Cadadka caymiska
Caafimaad darrada <50 %	15 cadadka qiimaha aasaasiga
Caafimaad iyo dhaqaale darri ugu yaraan 50 %	30 cadadka qiimaha aasaasiga
Magdhawga dhimashada	1 cadadka qiimaha aasaasiga
Magdhawga dhimashada caymis kujiraha iyadoon loo eegin sababta haddii uu wakhtiga shilka buuxinin da'da 25 sano.	1 cadadka qiimaha aasaasiga
Kharashyada caafimaadka, dhaawaca ilkaha- iyo safarada	Kharashyada lagama maarmaanka ah iyo kuwa macquulka ah
Dharka iyo muraayadaha indhaha (Waxay khuseeyaan haddii dhaawa shilalka uu ku yimid dhakhtarka ama booqashada dhakhtarka ilkaha)	Ugu badnaan 0,25 cadadka qiimaha aasaasiga
Magdhaw nabar	Si waafaqsan shaxda TSN laga bilaabo heerka "Si cad u muuqda"
Xanuun gubasho iyo xanuun	Si waafaqsan shaxda
Qalab gargaar	Kharashyada lagama maarmaanka ah iyo kuwa macquulka ah
Kharashyo dheeri ah	Kharashyada lagama maarmaanka ah iyo kuwa macquulka ah
Baxnaanin caafimaad	Kharashyada lagama maarmaanka ah iyo kuwa macquulka ah
Caymiska xaaladaha adag	Ilaa 10 daawayn
Qaadsiin cudur	5 cadadka qiimaha aasaasiga
Naafanimada ka dhalata isku dayga ismiidaaminta ee qofka caymiska kujira oo wakhtiga dhaawaca shilka gaarin 20 sano.	Kor ka eeg Caafimaad iyo dhaqaale darri

- Caymiska wuxuu shaqeynayaa bixin caymis la'aan
- Cadadka qiimaha aasaasiga ah waa 48 300 koron sanadka 2022

Caymisku wuxuu ka shaqeynayaa aduunka oo dhan 12 bilood gudahooda.
Maskaxda ku hay in tani aysan ahayn caymis socdaal. Haddii aad u safrayso meel ka baxsan waqooyiga Yurub, waxaad had iyo jeer u baahan tahay caymis socdaal oo gaar ah, kaas oo sidoo kale khuseeya kharashyada ka dhasha jirooyinka dibadda iyo guri usoo xamuulidda bukaanka dibadda marka jirro iyo shilal dhacaan.

Ardayda dhammaysata waxbarashadooda dugsiga xanaanada, fasalka xanaanada, dugsiga hoose/dhexe iyo sare, caymisku waxa uu khuseeyaa ilaa 1da Sebtembar ee isla sanadka socda.

Marka uu shil dhaco

Marka uu dhaawac dhaco, waxaa nagula soo ogaysiinaya ayadoo lasoo marsiinaya:
Mareegta: https://lansforsakringar.se/gbgstad

Guji "Halkan ka samay wargelin la xariirta waxyeelada", bogga xiga waxaad gujisaa sanduuqa cas "Wargeli waxyeelada" ka dib waxaad buuxinaysaa macluumaadkaaga.

Talefoon: 031-63 80 00

Tallabooyinka markii waxyeelo dhacaan

- Raadso dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha oo xidhiidh la leh Sanduuqa Caymiska
- Keydi dhammaan rasiidyada
- Baahida tagsi ee u socodka iyo ka soo noqoshada dugsiga ee uu sababay shilka waa in lagu caddeeyaa shahaado ka timid dhakhtarka daaweynta. Shahaadadu waa inay sheegtaa muddada tagsiga loo oggolaaday. Kahor intaadan dalban safarrada tagaasida ee dugsiga, shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän waa in lala xiriiraa si loo xaqiijiyo. U soo dir cadeynta marka warbixinada waxyeelada gudbineysid adigoo isticmaalaya shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän boggooda internetka ama iimayl ahaan. Kadib xaqiijin katimid shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän ayaa waxaa la dalban karaa safarrada tagaasida.
- Marka ay waxyeelo dhacdo waa in sida ugu dhaqsaha badan wargelin waxyeelo lala sameeyaa shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän.

Waxa fiican in laga ogaado caymiska

SHURUUDAHA CAYMISKA

Wargelintaan caymiseed waxay kaliya sharaxaad kooban ka bixineysaa caymiska. Marka waxyeelada la maareynaayo waxaa la dabaqayaa shuruudaha ku jira heshiiska u dhexeeya magaalada Göteborg iyo shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän. *Nala soo xidhiidh wixii macluumaad dheeraad ah.*

DHAAWACA SHILKA

Dhaawac shil waxaa loola jeedaa dhaawac jirka ah oo si aan ikhtiyaari ahayn kuugu dhacay qaab dhacdo dibadeed ah oo si lama filaan ah. Dhacdooyinka dibadda waxaa loola jeedaa jug dibadda ah oo ka dhan ah jirka. Dhaawaca shilku waa inuu u baahday daaweyn.

Dhaawac shil waxa la mid ah dhaawacyada ay sababaan barafowga, kulaylka, qorrax-kulaylka, dhaawaca seedda cidhibta, kala baxa jilibka iyo qabadsiin laga qaaday qaniinyada shilinta awgeed.

CAYMISKA XAALADDA ADAG

Waxaa kamid ah haddii ay kugu dhacdo jirro maskaxeed adag oo degdeg ah lana xiriirta

- dhaawac shil oo halis ah
- weerar, hanjabaad, dhac ama kufsi (cadeyn wargelin boolis ayaa loo baahan yahay)

Magdhawga waxaa lagu bixiyaa kharash macquul ah ilaa toban daawayn oo loogu tago dhakhtarka cilminafsiyeedka/daaweeyaha cilmi nafsiga ama qof kale oo loo tababaray wicitaanada taageereed. Daawaynta waa in ay tilmaamaan ama ogoladaan shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar. Caymisku ma khuseeyo jirroyinka dhimirka ee ay sababaan dhibaataynta sida cagajuglaynta.

NAAFANIMO KU TIMID DHAAWAC SHIL

Naafanimada caafimaadka waxaa loola jeedaa naafonimada mustaqbaleed oo joogta ah kuna timaada shaqada jidhka.

Naafanimada maaliyadeed micnaheedu waa hoos u dhac joogto ah oo ugu yaraan 50% ah oo ku yimaada awoodda qofka dhaawacmay awoodiisa shaqo.

Magdhawga waxa lagu bixin karaa naafo caafimaad ama mid dhaqaale. Qiimaynta kama dambaysta ah waxa la samayn karaa oo keliya marka dhaawacu bogsado oo dhakhtarku qiimeeyo in xaaladdu tahay mid taagan. Magdhawga waxaa lagu bixiyaa qayb weyn oo ka mid ah cadadka caymiska oo u dhigma heerka naafanimada.

KHARASHYADA CAAFIMAADKA, SAFARADA- IYO DHAAWACA ILKAHA

Magdhawga waxaa lagu bixiyaa kharashyada lagama maarmaanka ah iyo kuwa macquulka ah ee daryeelka ama daawaynta uu dhakhtarku u qoro bogsashada dhaawaca.

Haddi ay dhacdo dhaawac ilig, magdhow ayaa lagu bixinayaa kharashaadka ay horay u ansixiyeen shirkadda caymiska ee Länsförsäkringar Göteborg iyo Bohuslän. Daawaynta degdega ah ee lama huraanka ah waa la bixiyaa iyada oo aan ogeysiis hore la helin.

Dhaawaca ilkuhu ee ay sababto calalinta ama qaniinyada kuma jiraan.

Magdhaw waxa lagu bixiyaa safarada lagama maarmaanka u ah daryeelka iyo daawaynta. Haddi aad ku qasbantahay sida ku cad warqadda dhakhtarka inaad isticmaashid gaadiid gaar ah inta lagu jiro daawaynta si aad u gudato shaqadaada xirfadeed ama dugsiga magdhow ayaa lagugu siin karaa kharashyada dheeraadka ah ee khuseysa inta u dhexeeya guriga iyo goobta shaqada ama dugsiga.

MAGDHAW DHIMASHO

Xaq la xariira magdhow dhimasho ayaa jira haddii dhaawaca shilka uu horseedo dhimashada qofka caymiska kujira saddex sano gudahood laga bilaabo wakhtiga shilku dhacay. Xaq magdhow dhimasho sabab kasta ha ahaatee wuu khuseeyaa qofka ceymiska kujira kaas oo wakhtiga dhaawaca aan gaarin da'da 25. Wuxuu khuseeyaa da’da laga bilaabo 0 iyadoo shuruudu ay tahay in ilmuhu nool yahay markuu dhalanayo uuna helay nambarka aqoonsiga.

DHAR,MURAAYADAHA INDHAHA IYO WIXII KALE

Haddii dhaawaca shilka uu sababay booqashada dhakhtarka ama dhakhtarka ilkaha, waxaa loo celin doonaa lacagta dharka gaarka ah, koofida difaaca, muraayadaha, qalabka maqalka iyo qalabka kale ee naafada caawiyo oo wakhtiga shilka uu xernaa. Haddii shayga burburay la hagaajin karo, magdhow ayaa la bixiyaa oo kharashka dayactirka ah.

MAGDHAW NABAR

Magdhaw ayaa la siinayaa haddii nabarku ugu yaraan muuqashadiisa cadyahay, laga bilaabo heerka B sida ku cad shaxda, ugu horrayn hal sano ka dib dhaawaca shilka. Shuruudda magdhowga ayaa ah in dhaawaca uu u baahday daaweyn.

XANUUN GUBASHO IYO XANUUN

Magdhawga waxaa lagu bixiyaa si waafaqsan shaxda marka ay dhacdo in wakhtiga bogsashada degdega ahi uu dhaafo 30 maalmood.

MAGDHAW QALAB GARGAAR

Magdhaw waxa lagu bixin karaa kharashyada, kuwaas oo aan laga bixinin meel kale,loogana talogalay qalab gargaar uu dhakhtar qoray eena yareyn kara xaaladda naafanimo. Shirkadda caymska ee Länsförsäkringar waa in ay horay u sii ansixisaa kharashaadka.

BAXNAANIN CAAFIMAAD

Magdhaw waxaa lagu bixin karaa tallaabooyinka ay dhakhaatiirtu soo qoraan ee looga dan leeyahay in lagu noqdo shaqada ama waxbarashada.

KHARASHAADKA DHEERIGA AH

Haddii dhaawaca shilku u baahday daawayn dhakhtar ama mid ilkeed, waxaa la bixinayaa kharashaadka dheeraadka ah ee shakhsiyeed oo aan laga fursan karin oo ka ratima dhaawaca shilka ee dhacay intii lagu jiray jirrada degdegga ah. Dakhliga shaqo ee lumay magdhaw malaha.

QAADSIIN CUDUR

Caymisku wuxuu khuseeyaa qaadsiinada fayraska HIV iyo cagaarshow B iyo C, kuwaas oo ay si toos ah ugu dhasho dhaawac shil.

Länsförsäkringar Göteborg och Bohuslän

Soo bandhigid ku saabsan ku darsasho caymis jirro

Carruurtu waa kuwa ugu qaalisan ee aan haysanno. Iyadoo taasi jirto, baabuurka iyo guriga ayaa inta badan ka caymis fiican carruurta. Waxaan kuusoo bandhigeynaa inaad ku kabto caymiska shilalka ee magaalada Göteborg caymis sidoo kale daboolaya, tusaale ahaan, naafanimada ay sababto jirro[2].

Jirrada waa sababta ugu badan ee keena naafanimada

Caymiska uu ilmahaagu ka helo magaalada Göteborg wuxuu khuseeyaa oo keliya haddii shil dhaco, laakiin waxa ugu badan ee naafanimada carruurta ku keena waa jirro. Waxay tusaale ahaan noqon karaan cudurrada maadooyinka dheef-shiid ama cudurrada xubnaha dareenka.

Cadadka caymiska

Cadadka aasaasiga ah ee ay dhacdo naafanimo waa 10 cadadka qiimaha aasaasiga ah[1].

Sidan ayaa loo xisaabiyaa magdhowga naafanimada caafimaadka

Magdhawga **naafanimada caafimaad** waxa lagu bixiyaa boqolkiiba inta cadad caymiska aad dooratay. Naafanimada caafimaad ee ah 20% ama ka badan waxay sidoo kale bixisaa magdhow dheeraad ah, eeg shuruudaha. Magdhawga ugu sarreeya ee suurtogalka ah waa 300% cadadka caymiska.

Sidan baa loo xisaabiyaa magdhowga marka ay dhacdo naafonimo xagga shaqada ah

Magdhawga **naafanimada maaliyadeed** waxaa lagu bixiyaa boqolkiiba inta caymiska aad dooratay. Naafanimada caafimaad ee ah 10% ama ka badan waxay sidoo kale bixisaa magdhow dheeraad ah ee la xariirta naafanimada maaliyadeed, eeg shuruudaha. Magdhawga ugu sarreeya ee suurtogalka ah waa 140% cadadka caymiska.

Magdhawyada kale ee la bixin karo

- Kharashyada caafimaadka- iyo safarka marka uu xanuun yimaado
- Booqashada isbitaalka iyo kaalmada daryeelka degdegga ah
- Baxnaaninta iyo qalabka gargaarka
- Kabidda kharashka
- Magdhawga dhimashada

Caymisku wuxuu khuseeyaa ilaa xad xaddidan cudurrada qaarkood.

Cadeynta caafimaadka

Markaad codsato caymis jirro, waxaanu samaynaa qiimayn caafimaad. Inta badan, ilmuhu waxa uu heli karaa caymis jirro, laakiin waxa aanu ka reebnay jirrooyinka iyo dhibabka hore u jiray marka aad caymiska codsanayso. Taasi waa sababta aan ugu baahanahay inaan wax badan ka ogaano caafimaadka ilmahaaga. Markaad buuxiso cadeynta caafimaadka, waxaan aqoon u helnaa ilmahaaga taasoo noo ogolaaneysa inaan qiimeyno caymiska aan ku siin karno.

1) Cadadka qiimaha aasaasiga ah waa 48 300 koron 2022
2) Caymiska waxaa la geli karaa ilaa da'da 18, waana heshiis aad si gaar ah ula geli kartaan shirkadda caymiska ee Länsförsäkring

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo wargelinta

Wac 031-63 80 00 si aad ugu heshid wixii macluumaad dheeraad ah ama si boostada lagugusoo diro cadeynta caafimaadka iyo foomka wargelinta.